# Jabsashada xogta

**Jabsashada xogta macnaheedu waxaa weeyaan in uu qof isticmaalo nidaamka xogta isaga oo anan sharci uu ku isticmaalo haysanin. Arrintaasi waa fal dambi ah oo daran. Inay dambiileyaal helaan xogta shaqsiga ah waa arrin walwal wayn dhalin karta. Boggan waxaan ku ururinay macluumaad khuseeya jabsashada xogta guud ahaan waxaanan sidoo kale talo ka bixinaynaa sida ay tahay inaad yeesho haddii aad ka shakisantahay in laguu gaystay jabsasho xogeed. Halkan waxaad sidoo kale ka helaysaa jawaabaha su'aalaha badanaa soo noqnoqda. La saco warbaahinta lagu kalsoonaan karo ee ka warbixinaysa kiiska. Waxaad sidoo kale xasuusnaataa in baraha bulshada macluumaadka lagu sheegayo aanu badankiisu run ahayn. Fadlan, ha faafinin war kutirikuteen ah ama macluumaad shaqsiyaad.**

## Halkeen ka heli karaa macluumaad?

**1**

Macluumaadka ku saabsan jabsashada xogta ee magaalada Helsinki

- Bogga internetka ee magaalada Helsinki oo uu cinwaankiisu yahay **hel.fi/tietomurto** waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo kiiskaas khuseeya.
- Nidaamka magaalada Helsinki ee u adeegista macaamiisha xogtooda la jabsaday: isniin-jimce saacadda 8–18, tel 09 310 27139 ama **kaskotietoturvatilanne@hel.fi**
- Heeganka xaaladaha xasaradaha ah ee magaalada Helsinki: isniin-jimce wakhti kasta oo maalinta ka mid ah, tel 09 310 44222.

**2.**

Caawimaadda xogta la faafiyay ee laga heli karo adeegga Suomi.fi

Dadka xogtooda la faafiyay hagitaanada ay saraakiisha dowladeed ugu soo saareen Suomi-fi **https://www.suomi.fi/oppaat/tietovuoto**

Waxaa qoraalkan hagitaanka ah laguugu sheegayaa waxaa kuu gudboon haddii xogtaada shaqsiga ah uu qof kale si khaldan u helo. Qoraalkan hagitaanka ah wuxuu xambaarsanyahay talooyin ku socda dhibbaneyaasha faafinta xogta ama haddii aad dhibbane u noqotay in macluumaadkaaga shaqsiga la xaday oo lagu adeegtay ama haddii tusaale ahaan uu kaa lumay baasaboor ama kaar aqoonsi.

**3.**

Halkeen wici karaa haddii jabsashada xogtu ay walwal kugu hayso

Heeganka xaaladaha xasaradaha ah ee magaalada Helsinki: isniin-jimce wakhti kasta oo maalinta ka mid ah, tel 09 310 44222

Taleefanka xasaradaha ee MIELI ry, isniin-axad wakhti kasta oo maalinta ka mid ah, tel. 09 2525 0111

Su'aala soo noqnoqda ee ku saabsan jabsashada xogta

## Maxaa laga hadlayaa marka jabsashada xogta laga hadlayo?

Jabsashada xogtu waxaay ka macno tahay in si sharci darro ah loo isticmaalay nidaamka xogta, adeeg ama in qalab si sharci darro ah loogu jabsaday aalad, sida in tusaale ahaan akawn iimayl ah loo isticmaalay si sharci darro ah iyadoo la adeegsaday macluumaadka isticmaalka oo si khaldan qofku u hantay. Jabsashada xogtu waa fal dambi ah oo ciqaab lagu muteysanayo laguna qeexay qaanuunka dambiyada, sidoo kale iskudayga jabsashada xogtu waa fal ciqaab lagu muteysan karo. Qofku inuu nidaam si sharci darro ah u galo oo kaliya ayaa buuxinaysa shardiyada falkaas dambiga lagu yaqaano, mana aha daruuri in qofka xogtiisa la jabsanayo ama macluumaadka halkaas ku jira laga faa'idaysto.

## Waa maxay waxa la hiigsanayo marka xog la jabsado, waana ayo cidda xogta jabsata?

Way adagtahay in la qiimeeyo ujeedooyinka ka dambeeya jabsashada xogta. Badanaa waxaa ka dambeeya faa'ido dhaqaale in uu qofku ka doonayo. Xogta la ilaaliyay ee nidaamyada ku jiraa waa kuwo lacag lagu heli karo. Nawaaxiga xogta lagu keydiyo ee la jabsaday waxaa sidoo kale loo isticmaali karaa in lagu faafiyo macluumaad dhaawac leh ama waa la fadhiisin karaa iyadoo baad lagu doonayo loona isticmaalo nidaamyada baadda ee dhaawaca keeni kara. Qofka soo weeraray nidaamka xogtu wuxuu tusaale ahaan u adeegsan karaa nidaamka uu jabsaday qayb ka mid ah weeraryadiisa tusaale ahaan weerarka joojinta adeegga.

Qofka falkaas gaysanaya ujeedadiisu waxaay noqon kartaa tusaale ahaan dhibaateyn, ama xattaa inuu jaajuuso haa'yad dowli ah. Dadka jabsashada xogta gaysta waa dambiileyaal, dad qayb ka ah dowlado ama xattaa shaqsiyaad gaar ah. Waa wax marar badan dhacda in xog la jabsado, laakiin kiisaska jabsashada xogta ee daran waa kuwo dhif iyo qaliil ah.

## Finland intee in leeg ayaa laysku dayaa in xog la jabsado ama laga warhayaa in xog la jabsaday sannadkii?

Jabsashada xogta marar badan ayaa sannadka gudahiisa laga warhelaa. Kuwaas badankoodu laakiin waa jabsasho akawnada baraha bulshada oo aanan cusleyn ama ololeyaasha xogta lagu urursanayo oo dadka lagaga xado macluumaadkooda akawnada bangiga.

## Isbaddal noocee ah ayaa ku yimidday dambiyada jabsashada xogta sannaddadii ugu dambeeyay?

Isbaddalka ugu wayn ee jabsashada xogtu waa in cidda arrimahaas gaysata ay xirfad horumartay u yeesheen sida ay u heli lahaayeen tirooyinka ama koodhyada aqoonsashada dhowrka talaabood ah loo isticmaalo marka nidaam la galayo. Caqliga sameyska ah

isticmaalkiisu wuxuu kordhiyay in luqadda ay adeegsanayaan dadka ololaha xog raadiska ah sameynaya uu sidii hore ka fiicnaado.

### Maxaa loo isticmaali karaa xogta la xado?

Xogta la xado waxaa loo isticmaali karaa in tusaale ahaan si sharci darro ah loo shaaciyo ama qofka helay wuxuu ku baadi karaa dhibbaneyaasha laga xaday isaga oo lacag ka codsanaya. Qaabisticmaalka dambiilenimadu wuxuu noqon karaa dhibaateyn, baadis ama jaajuusid.

Shaqsiga gaarka ah jabsashada xogta ah ee loo gaysanayo waxaa lagu isticmaali karaa in aqoonsigiisa la xado oo la siticmaalo oo qofka xaday uu isku dayo inuu iska dhigo qofka uu ka xaday xogtiisa shaqsiga ah. Jabshashada xogta waxaa sidoo kale lagu hiigsan karaa in qofka la dhibaateeyo. Qofka shaqsiga ah ee xogtiisa la jabsaday waxaay ku keeni kartaa dhibaato ah in nidaamyadiisu ay shaqeyn waayaan iyo in qof khaldan uu gacanta ku dhigo macluumaadkiisa shaqsiga ah.

### Sidee layskaga difaaci karaa jabsashada xogta?

Shaqsiga gaarka ah sida ugu wanaagsan ee uu iskaga difaaci karo waa inuu isticmaalo aqoonsashada qaybaha badan iyo inuu si guud uga warhayo ammaanka xogta guud. Aqoonsashada qaybaha badan waxaa looga jeedaa in la adeegsado nidaamyo kale oo soo raaca macluumaadka isticmaalaha iyo erayga ama tirada sirta ah oo lagu aqoonsado isticmaalaha. Nidaamyada aqoonsashada ah ee buuxinaya waxaa ka tusaale ah liiska lambarada ee halka mar la isticmaalo ee bangiga internetka loo isticmaalo ama tirooyinka qofka loogu soo diri karo taleefankiisa gacanta. In macluumaadka isticmaalaha iyo erayga ama tirada sirta ah qofka helaa uu ku guuleysto jabsashada xogta ah ee uu ku talo jiro waxaa sidoo kale ku xidhan inuu helo koodhka ama tirada halka mar la isticmaalo.

Inay dambiileyaal helaan xogta shaqsiga ah waa arrin walwal wayn dhalin karta. Qofka oo si walba oo loo baahnaa yeelay xattaa ayaa dhibbane u noqon kara jabsashada xogta.

### Hagitaanka xarunta ammaanka internetka ee shaqsiyaadka gaarka ah ku socda si ay iskaga difaacaan jabsashada xogta (Linki bannaanka ka ah bogga)

### Hagitaanka xarunta ammaanka internetka ee haa'yadaha socda si ay iskaga difaacaan jabsashada xogta (Linki bannaanka ka ah bogga)

### Maxay qabataa xarunta ammaanka saybarka ee Trafikom (Kyberturvallisuuskeskus), waa maxay doorkeedu?

Xarunta ammaanka sayberka ah waxaay leedahay waxqabad CERT la dhaho oo ah in ay ka shaqeeyaan ka hortagga jabsashada iyo ku xadgudbidda xogta, ay baadhaan oo ay warbixin ka sameeyaan arrimaha ammaanka xogta. CERT waxaa lagu falanqeeyaa

ogaysiisyada la xidhiidha jabsashada xogta waxaana lagu taageeraa ogaysiiska haa'yadaha sameeyay si ay uga gungaaraan jabinta ammaanka xogta. Xarunta ammaanka saybarka waxaa sidoo kale loogu qaybiyaa muwaadiniinta hagitaan ku saabsan waxa uu shaqsigu qaban karo haddii xogtiisa la jabsaday ama la faafiyay.

## MACLUUMAAD DHEERI AH

Macluumaadka ku saabsan jabsashada xogta ee magaalada Helsinki(Linki bannaanka ka ah bogga)
Wargelinta ka yimidday booliska Helsinki: Boolisku wuxuu baadhayaa kiis baaxad leh oo jabsasho xogeed ah oo nidaamka xogta ee magaalada Helsinki loo gaystay(Linki bannaanka ka ah bogga)
Qoraalka hagitaanka ee Tietovuoto.fi (Linki bannaanka ka ah bogga)
Xafiiska sarkaalka loo doortay ilaalinta macluumaadka (Linki bannaanka ka ah bogga)
Warka ka soo baxay xarunta ammaanka saybarka: Jabsashada xogtu maxaay tahay?
Hagitaanka xarunta ammaanka saybarka: Sidan ayaad iskaga difaaci kartaa jabsashada xogta

Waxaa la cusboonaysiiyay 13.05.2024